

# U magacaabista qof Abaalmarinta 'Victorian Senior of the Year Award'

Tilmaame ah sida loo isticmaalo

## OFFICIAL

Magacaabista Abaalmarinta Senior of the Year (qof waayeel ah oo sanadkaas howl lagu amaani karo qabtay) ee Victoria waxay furmaysaa isniinta 5-ta bisha May ee sanadka 2025.

Bilow in aad goor hore diyaariso magacaabistaada adiga oo raacaya afar tallaabo oo fudud.

## Afar tallaabo oo fudud oo aad gelinayso

### 1. Hubi u-qalmida

Musharixiinta loo abaalmarinayo Senior of the Year ee Victoria waa khasab inay ahaadaan:

- muwaadin ama qof deganaanshaha Australia (permanent resident) haysta,
  - qof degan Victoria iyo
  - 60 sano jir ama ka weyn, ama
- Aborijinal iyo/ama Torres Strait Islander qof ah oo deggan Victoria da'diisuna tahay 50 jir ama ka weyn. Inuu qofku asaga is magacaabo lama aqbalayo.

### 2. Dooro qayb ka mid ah qaybaha kala duwan ee abaal-marinada

Waxaa jira lix qaybood oo abaal-marino kala duwan ah:

- **Abaalmarinta Hogaamiyaha Gobolka (Premier) ee Waayeelka Sanadka (Senior of the Year)** ee Victoria waxay u aqoonsanaysaa shakhsiga ugu waxqabadkooda wanaagsan iyo bulshada iyo gobolka Victoria waxa ay u qabteen ee wax ku oolka ah.
- **Golaha Waayeelka (Council on the Aging - COTA) Abaalmarinada Waayeelka ugu Da'daalka badan Victoria (Victoria Senior Achiever Awards)** waxay aqoonsadaan horyaalada bulshada deegaanka kuwaas oo si weyn gacan uga geysta gabowga wanaagsan ee bulshadooda.
- **Abaalmarinta Saamaynta Soo Socota (Emerging Impact Award)** waxay aqoonsataa shaqsi ku cusub tabarucida oo saameyn weyn ku leh bulshadooda.
- **Abaalmarinta Gabowga Wanaagsan (The Positive Ageing Award)** waxay aqoonsataa shakhsiga wanaajiyaya wanaagga dadka da'da ah ee bulshadooda ka tirsan isagoo kor u qaadaya gabowga waxku-oolka ee firfircoon.
- **Kor-u-qaadida Horumarinta dhaqamada kala duwani (The Promotion of Multiculturalism Award)** waxay u aqoonsanaysaa shaqsi ku biirin kara la taaban karo bulshada si kor loogu qaado faa'iidooyinka kala duwanaanshaha dhaqameed ee bulshadooda iyo Victoria oo dhan.
- **Abaalmarinta Halyeyga Bulshada (The Veteran Community Award)** waxa ay u aqoonsataa shaqsi wax qabadkooda gaarka ah ee u sameeyay bulshada ruug-cadaaga ah. Qofka helaya abaalmarinta uma baahna inuu noqdo qof ciidan ka soo shaqeeyey.

### 3. Ururi maclumaadka

Si aad u sameyso magacaabid, waxaad u baahan doontaa macluumaadka ku saabsan qofka aad magacaabayso oo ay ku jiraan:

- Magaca oo dhamaystiran
- Nambarka taleefanka
- Da'da
- Cinwaanka iimaylka
- Cinwaanka waraaqaha loogu diro

Foomka magacaabista waxa uu ku waydiinayaa su'aalo ku saabsan shaqada mutadawacnimada ee uu qabtay qofka la magacaabay. Qaar ka mid ah su'aalaha laga yaabo in lagu weydiiyo waxaa ka mid ah:

- Ururkee/ama ururadee ayuu tabaruc ka sameeyey?
- Immisa saacadood/maalmood todobaadkii ayuu tabaruca sameeyay?
- Saamayn intee le'eg ayuu waxtarkoodu ku leeyahay bulshada?

### 4. Soo hel tixraacyo iyo sawir

Talaabada u danbeysa waa macluumaad taageeraya. Qofka aad adigu magacaabayso, waxaad u baahan doontaa:

- Tixraacyada 2 qof, oo ay ku jiraan faahfaahinta meesha lagala xiriirayo
- Sawirka qofka la magacaabay.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan shuruudaha gelitaanka, booqo shabakada internetka Seniors Online: [www.seniorsonline.vic.gov.au/awards](http://www.seniorsonline.vic.gov.au/awards)